

Xaqqiida Cudurada Galmada (STD)

(Syphilis “Syph”, “The Pox”)-Som

Waraabowga ama Isfilitada (oo ay keento bakteeriyada loo yaqaan *Treponema pallidum*)

CALAAMADAHA LAGU GARTO

Wejiga 1aad (Xilliga hore ee waraabowga)

- Calaamadu waxay soo muuqdaan 1-12 toddobaad ka dib marka cudurka la qaado
- Nabarro aan **xanuun lahayn** oo ka soo baxa afka, xubnaha taranka ama dabada
- Nabaradu waxay ku “qarsoonaan” karaan gudaha xubinta taranka haweenka ama malawadka; Nabaradu waxay gaaraan 1-5 toddobaad
- Nabaradu way baaba’aan, laakiin waraabowgu weli wuu ku jiraa dhiigga

Wejiga 2aad (Xilliga labaad ee waraabowga)

- Calaamadu waxay soo muuqdaan 6 toddobaad ilaa 6 bilood ka dib marka ay finanka cudurkani soo baxaan
- Finan yaryar (faniinac) oo ka soo daata meel kasta oo jirka ka mid ah
- Calaamado u eg hargabka nooca Flu-ga

Wejiga Suursan (qarsoon)

- Ma jiraan wax nabarro ama finan ah, laakiin waraabowgu weli wuu ku jiraa dhiigga isagoo waqtiyada dambe saameyn ku yeelan kara wadnaha, maskaxda, iyo xubnaha kaleba (wejiga saddexaad ee waraabowga)

ISU GUDBINTA

Waraabowga waxa Fidiya:

- Galmada caadiga ah
- Galmada aan caadiga ahayn
- Hooyo cudurka qabta oo u gubisa ilmaha

DHIBAATOYINKA KA YIMAADA CUDURKAN

Haddii Aan la Daaweyn, Waraabowgu wuxuu Keeni Karaa:

- Cudurka wadna xanuunka
- Indhabeel
- Waxyeello soo gaarta maskaxda

Waraabowga Waqtiga Urka la Leeyahay Wuxuu Keeni Karaa:

- In haweenka uurka leh dhalaan ilmo aan nooleyn
- Ilmaha oo dhasha isagoo wax qaba (defects)
- Waxyeello culus oo soo gaarta lafaha, maskaxda, sambabada, beerka, iyo xubnaha kale ee ilmaha cudurka qaaday

KA HORTAGGA

Talooyin ku Saabsan sida loo Yareeyo Fiditaanka Waraabowga:

- Nabarada ku dhaca xubnaha taranka waxay noqon karaan kuwo xubnahaasi kaga dhaca meelaha bacda galmadu (condom) ay dabooli karto. Waxay kaloo ku dhici karaan meelaha ayna bacda galmadu dabooli karin. Bacda galmada, marka loo isticmaalo si joogta ah saxna ah, waxay yarayn kartaa khatarta inaad qaaddo waraabowga kaliya marka bacdu ay ku daboolan tahay meesha nabarka leh.
- Isticmaal bac galmo oo ku habboon markasta oo aad samaynayso galmo caadi ah ama aan caadi ahayn
- Yaree tirada dadka ay galmadu idinka dhaxayso
- U tag dhakhtarkaaga si aad baaritaan u samaysid haddii aad ka shakido inaad cudurka qaadday
- Ogeysii dadka ay galmadu idinka dhaxayso isla markiiba haddii aad qaaddo cudurka
- Waa inaad hubisaa in dadka ay galmadu idinka dhaxayso la baaro lana daaweeyo

DAAWEYNTA

Daaweynta Waraabowga:

- Waraabowga waa la daaweyn karaa marka la qaato daawadiisa saxda ah ee dhakhtarku qoro
- Dadka ay galmadu ka dhaxayso waa in isku mar la daaweeyaa

OGOW: In daawada ka dib qofku dib cudurka u qaadi karo.

WIXII WARAR DHEERAADA, LA XIRIIIR:

Infectious Disease Epidemiology, Prevention
and Control Division
STD and HIV Section
Minnesota Department of Health
P.O. Box 9441
Minneapolis, MN 55440-9441
(612) 676-5414; (612) 676-5653 TTY

Khadka Teleefonka ee Qorshaynta Qoyska iyo
Cudurada Galmada (STD) ee Minnesota
(Minnesota Family Planning and STD Hotline)
1-800-783-2287 Teleefonka caadiga ah /TTY

Khadka Taleefonada Hay’adda Qaranka CDC Qaybta
Qaabilsan Cudurada STD iyo AIDS
(CDC National STD and AIDS Hotlines)
1-800-227-8922; 1-800-243-7889 TTY